QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Hagista Su’aalaha Aalaaba La Isweydiiyo (FAQs)

Rugaha Madadaalada Dibedda

(La Cusboonaysiiyey 05-05-2021)

Guudmarka

Hoos waxaa ku yaala jawaabaha Su’aalaha Aalaaba La Isweydiiyo (FAQ) ee ku saabsan Hagista Waaxda Rugaha Madadaalada Dibadda ee Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA).. OHA waxay bixisaa oo waxay si aan joogta aheyn u cusbooneysiin kartaa Su’aalahan Aalaaba La Isweydiiyo (FAQ) si ay ugu caawiso bulshada inay fahamto hagista, ka jawaabceliso su’aalaha saamileyda, oo kala caddeyso sida hagista u khuseyn karto xaaladaha gaarka ah. Su’aalaha Aalaaba La Isweydiiyo (FAQ) looguma tallogelin inay galaan booska hagista laakin inay ka caawiyaan fasirka, kabaan, oo gacan ka geystaan buuxinta faahfaahinta hagista.

S1: Ma la oggolyahay madadaalada darjiinka bannaanka inay ku shaqeeyaan sida waafaqsan Hagista Rugaha Madadaalada Bannaanka? Waa maxay tilmaamaha nadiifinta beerta madadaalada?

J1: Haa, darjiimaha madadaalada bannaanka waxaa loo tixgeliyaa rugaha madadaalada bannaanka oo waxaa looga baahanyahay inay raacaan Hagista Waaxda ee Rugaha Madadaalada Bannaanka. Hawlwadeennada darjiinka madadaalada waa inay u hoggaansamaan xadeynada mugga ugu badan ee loogu tallogalay rugaha madadaalada bannaanka sida ku saleysan heerka halista la cayimay ee loogu tallogalay gobolka meesha ay darjiinka madadaalada ku yaalo. Ka tixraac Waaxda Hagista ee Rugaha Madadaalada Bannaanka ee loogu tallogalay shuruudaha nadiifinta gaarka ah. Hawl kasta oo gudaha beerta madadaalada ah, sida baraf ku taraaraxa gudaha ama gaari caruureedyada gudaha, waa inay raacaan Hagista Waaxda ee Rugaha Madadaalada Gudaha. Meelaha gudaha ayaa quseeya xadidaada mugga ugu badan ee loogu tallogalay rugaha madadaalada gudaha.

S2: Miyay tahay doomaha biyaha inay ku shaqeeyaan sida waafaqsan Hagista Waaxda loogu tallogalay Rugaha Madadaalada Bannaanka?

J2: Haa, doomaha biyaha waxaa loo aqoonsanyahay madadaalo dibadeed oo hawlwadeenada doomahaa waa inay raacaan Hagista Waaxda ee Rugaha Madadaalada Dibadda. Hawlwadeenada waa inay u hoggaansamaan xaddidaada mugga ugu badan ee rugaha madadaalada dibadda iyadoo lagu saleynayo heerka

halista la cayimay ee goobolka meesha ay doonta biyaha ka shaqeyso. Haddii ay tahay doonta biyaha ee daboolan ama aysan buuxinayn qeexitaanka “bannaanka” markaa doonta biyaha waxaa loo tixgelinayaa madadaalada gudaha waana inay u hoggaansanto shuruudaha iyo hagista hawlaha gudaha.

S3: Ganacsigeyga wuxuu ka fikirayaa wax ku saabsan u guurista howlgalada gudaha bannaanka si loo kordhiyo mugga iyadoo lagu saleynayo heerka halista cayiman ee gobolka meesha ay rugtayda ku taalo. Maxaa u-qalma “bannaanka” haddii ganacsigeygu doonayo inuu u hoggaansamo oo ku shaqeeyo Hagista Waaxda ee Rugaha Madadaalada dibadda?

J3: Gudaha Hagista Waaxda ee Rugaha Madadaalada Dibadda, “bannaanka” waxaa loola jeedaa goobta hawada u furan oo yeelan karta har kumeelgaar ah ama go'an, sida shiraaca ama saqafka, maadaama booska uu leeyahay ugu yaraan boqolkiiba 50% oo dhudhun labajibaaran oo dhinacyadiisa u furan qulqulka hawada halkaasoo dhinacyadaasi furan uusan ku xigin midba midka kale. Howlwadeenada waxay ka shaqeyn karaan kaliya madadaalada bannaanka iyagoo isticmaalaya Hagista Waaxda ee Rugaha Madadaalada Bannaanka haddii ay hubiyaan in boos walbo oo bannaanka ah loo sameeyo ama loo isticmaalo adeegyada ama howlgalada buuxiya qeexitaanka “bannaanka”. Haddii booska uusan buuxin sharaxaada banaanka, kadib adeegyada ama howlgalada waxaa loo tixgeliyaa sida gudaha sidaas darteedna waa inay u hogaansamaan sharuudaha iyo hagida howlwadeenada gudaha.

S4: Munaasabad madadaalo ee bannaanka ka dhacaysa, sida tartanka fardaha, haddii kaqeybgaleyaal ay ka baxaan tartanka fardaha, hawlwadeenada tartanka fardaha ma u oggolaan karaan kaqeybgaleyaal cusub inay soo galaan haddii aysan tiradu ka badneyn xaddidaada ugu sarreysa ee mugga iyadoo lagu saleynayo heerka halista ee gobolka meesha uu tartanka fardaha ka dhacayo?

J4: Haa, si kastaba ha noqotee OHA waxay ku talineysaa in howlwadeenada madadaalada banaanka ay ku xaddidaan ka qaybgaleyaasha hal qayb oo ka qaybgalayaal ah bilowga munaasabada oo aysan u oggolaan ka qaybgaleyaal cusub inay soo galaan marka ka qaybgaleyaasha asalka ahaa ay baxaan.

S5: Miyey Daawadeyaasha jooga munaasabadaha ciyaaraha lagu daray xaddidaada tirada dadka ee ugu badan ee daawan kara madadaalada bannaanka ka dhacaysa?

J5: Maya. Daawadeyaasha waa inay u hoggaansamaan xaddidaada tirada dadka ee Hagista Goobaha Madadaalada Bannaanka. Wixii ah munaasabadaha ciyaarta, daawadayaasha waa inay ku jiraan meelaha loogu tallogalay ee leh meelo laga soo galo, laga baxo iyo musqulo ka gaar ah kuwa ka qeybgalayaasha ciyaaraha, taas oo ugu yaraan lix (6) fuud u jirta howlaha ciyaaraha. Xaddidaada mugga dadka ee goobaha madadaalada banaanka ay ka dhacayso waxay khuseysaa oo kaliya meelaha loogu tallogalay daawadayaasha. Xaddidaada mugga ee daawadayaasha ah waa inaysan ku saleysneyn dhammaan goobaha madadaalada bannaanka iyo jir dhiska.

S6: Miyeey daawadayaasha/kaqeybgalayaasha munaasabada madadaalada banaanka, sida dhacdooyinka ciyaaraha, ku cuni karaan oo ku cabbi karaan kuraasta loo qoondeeyay?

J6: Haa. Daawadeyaashu way wax ku cuni karaan oo ku cabbi karaan kuraastooda loo qoondeeyay ama meelaha loogu tallogalay ee fadhiyada ah ama aagagga goobta. Hawlwadeenada dejinta madadaalada bannaanka waa inay u hogaansamaan Hagista Cunitaanka iyo Cabitaanka Dhismooyinka Markaad siinayso cunto iyo cabitaan daawadayaasha.

Xadidaada mugga ee fadhiga bannaanka loo qoondeeyey ama aagga joogsiga waa inuusan ka badnaan heerka halista ee xadidaadaha mugga bannaanka ee cunidda iyo cabbidda rugaha gobolka meesha ay dhacdadu ka dhacdo. Tusaale ahaan, gobollada halista badan, fadhiyada loo qoondeeyey ama meelaha joogsiga ma yeelan karaan wax ka badan 75 qof agagaaraha bannaanka hal mar. Hawlwadeenada munaasabaddu waxay yeelan karaan in ka badan hal boos oo cayiman ama aaga joogsiga, laakiin aagaggan waa inay ahaadaan kuwo kala duwan oo leh jidad iyo ka bixitaanno gooni ah.

Daawadeyaasha cuntada iyo cabitaanka dib ugu celiya kuraastooda (ama loo geeyo kuraastooda) waa inay joogteeyaan maaskaradooda, weji xerka ama daboolka wajiga haddii aysan si firfircoon wax u cunin ama u cabbin. Daawadeyaashu waa inaysan wax cunin ama cabbin ilaa ay fadhiyaan kuraastooda ama fadhiga loogu tallogalay ama aaga joogsiga.

S7: Haddii aan ku martigaliyo xaflad bannaanka beerta ee leh iibiyeyaasha cuntada, hagitaankee ayaan ku qasbanahay inaan raaco si aan ugu isticmaalo cunnada iyo cabitaanka goobta?

J7: Martida dhacdooyinka bannaanka guud ee dadweynaha, sida baakinka, waa inay raacaan Tilmaamaha Dhismayaasha Madadaalada Dibadda. Tilmaamahan waxaa ka mid ah shuruuda loogu hoggaansamo Hagista Cunitaanka iyo Cabitaanka ee Rugaha Haddii oggolaanshaha ku isticmaalida cunnada iyo cabitaanka goobta. Hawl wadeyaasha munaasabaddu waa inay u cayimaan aag ama aagag cunno iyo cabitaan lagu cunaayo iyadoo la raacayo shuruudaha xaddidaadda mugga ee goobaha cunidda iyo cabitaanka ee heerka halista gobolka meesha ay dhacdadu ku taallo. Kaqeybgalayaasha munaasabada looma ogola inay ku dhex wareegaan munaasabada markay wax cunayaan waxna cabayaan waana inay xirtaan maaskaro, wejiga daboola ama daboolka wajiga ilaa ay si firfircoon wax u cunayaan ama u cabbayaan.

S8: Gobolada halista badan, mugga banaanka ee 100 waxay umuuqataa inay u ogolaanayso goboladaas mararka qaar inay yeeshaan mug badan ee gobolada halista badan leh, oo ku daboolan mugga 15%. Haddii goobtayda bannaanka ay qaadi karto 250, waxaan heli karaa oo keliya 37 qof oo khatar sare ku jira, laakiin haddii aan ku jiro khatar aad u daran, waxaan heli karaa 100. Sidee taas loo oggol yahay?

J8: Xadidaada mugga banaanka ee goobaha madadaalada banaanka ee halista daran waa ugu badnaan 100 qof. Tani waxay ka dhigan tahay in 100 qof, oo ay ku

jiraan shaqaalaha, loo oggol yahay dhismaha kaliya haddii ay suurtagal tahay marka loo eego shuruudaha kala fogaanshaha. Hagista ruggaha madadaalada banaanka waxay ubaahantahay ugu yaraan lix (6) fiit oo masaafo ah oo udhaxeysa shakhsiyaad aan isku xisbi ahayn. Hawl wadeenada ruggaha waa inay u hogaansamaan shuruudaha kala fogaanshaha. Khatarta aadka u daran, goob bannaanka ah oo qaadi karta 250 qof kuma lahaan karto 100 qof goobta haddii aan foomka kalafogaanshaha la buuxin karin. Waa suurtagal, laakiin uma badna, in aasaaska madadaalada bannaanka uu yeelan karo dad badan oo ku sugan degmo khatar badan leh marka loo eego gobolka halista sare leh.

S9: Waa maxay tilmaamaha ay raacaan hawlwadeyaasha dalxiiska webiga?

J9: Doomaha dalxiis ee wabiga ayaa loo oggol yahay inay ka shaqeeyaan Oregon. Dalxiisyada webiga waxaa loo tixgeliyaa madadaalo gudaha ah ama madadaalo bannaanka ah, iyadoo kuxiran haddii howlaha ka dhacaan gudaha iyo dibedda markab dalxiis. Sidaas darteed, howlwadeenada doonta dalxiiska wabiga waa inay raacaan Hagida Waaxda ee Rugaha Madadaalada Gudaha iyo/ama Hagida Waaxda ee Rugaha Madadaalada Bannaanka. Inta lagu jiro wabiga, halwadeenada markab dalxiis ee wabiga waa inay u hoggaansamaan shuruudaha heerka halista ee gobalka halka ay doonta ka amba baxeyso. Markay ka soo degayaan gobol kale, rakaabka iyo xubnaha shaqaalaha waa inay raacaan dhammaan shuruudaha heerka halista ee gobalka ay ka soo degaan. Maraakiibta dalxiiska ee caalamiga ah oo soo gala Oregon waa inay u hoggaansamaan amarrada shiraaca shuruudaysan oo ka socda Rugaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada.

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaad naafo ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacadda ballaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.